# kutaanta

Kutaanta (Cimex lectularius) ayaa si weyn ugu fiday aduunka daafihiisa. Badanaa waxee ku fidaa ayadoo raacaysa xamuulka, sariiraha ee ku jirto iyo alaabta guriga. Waxay habeenkii ka nuugtaa dhiiga dadka iyo xaywaanada. Maalinkii waxay ku dhuumataa sariirta agteeda, dildilaaca mugdiga ah ee alaabta guriga ama looxyada sariiraha, firaashyada korkooda ama hoostooda. Kutaannada wax lug ah kuma laha xaaladaha nadaafadda - qof kasta way saameeni kartaa. Hadii aay dhacdo xaaladaha caabuqa, xakamayn cayayaan xirfadaysan kaliya ayaa caawin doona.

**muuqaal**

- kuwa qaangaarka ah waxuu dhererkoodu yahay ilaa 4-6 mm wayna fidsanyhiin, dhererkoodu waa ku dhawaad 10 mm marka si buuxda loo quudiyo, midabkiisuna casaan waaye.
- Kutaanta dhalaanka ah waa yaryartahay colorkeedana waa khafiif.




kutaanta waawayn oo quudaneesa dhiig. sawir: Magaalada Zurich, ilaalinta deegaanka iyo caafimaadka

**Muhiimadda iyo caadooyinka**

- Dhiig ka nuugtaa dadka iyo xayawaanka rabaayada ah, gaar ahaan habeenkii.Waxay habeenkii ka nuugtaa dhiiga biniaadanka iyo xaywaanada.
- Ku dhuumataa dildilaaca sariiraha, alaabta guriga iyo qolalka maalintii.
- Ka guuri kartaa hal guri una guuri kartaa kan xiga, tusaale; haddii la isku dayo in lagu xakameeyo buufinta cayayaanka.
- Dumarku waxay dhalaan ilaa 500 oo ukun.
- Wuxay u adkeysan kartaa qabow muddo dheer wuxayna soomi kartaa ilaa 6 bilood.
- Waxay noolaataa ku dhowaad 1 sano.

**dhaawac**

- qaniintaa meelaha qaawan (qoorta, wejiga, gacmaha, anqawyada, iwm) habeenkii.
- Noolaha ay qaniinto wuu ku dareen-celiyaa maqaarka oo cuncuna badanaa saacado ama maalmo ka dib qaniinyada.
- Qiyaastii 20% dadku ma laha dareen-celinta maqaarka ka dib qaniinyada kutaanta.
- Gudbinta cudurrada ee kutaanta ayaan weli la garanayn.




Meertada nolosha ee kutaanta. Sawir: Asaaska kutaanta

**xakamayn**

- Kaliya xakamee haddii kutaanta la helay.
- **Ha isku dayin inaad naftaada ku buufisid buufinta cayayaanka, tani waxay ka cabsiinaysaa kutaanta, waxay sababtaa inay ku faafto dhammaan aqalka ama guriga**.
- Kaliya waxaa lagu xakameynayaa xakamayn cayayaan xirfadaysan waana in aad haysataa shahaadada federaalka Swiss.
- Bartilmaameedku waa inuu noqdaa mid si buuxda ciribtirid u ah.
- Inta badan, tani waxay u baahan tahay in ka badan hal daawada cayayaanka. Beddelka: Daawaynta kulaylka ama qabow, boodhka silicate-ka, uumiga.
- **Daawaynta kama ilaalinayso dib u soo baxa kutaanta.**

**Ka hortag**

- Ka hubi sariiraha iyo alaabta guriga ee la isticmaalay dhiqlaha, xadhkaha ama raadka dhiiga.
- Sanduuqyada alaabta lagu keeno ee la isticmaalay waxaa sidoo kale laga yaabaa inay kutaan ka buuxsantay.
- Ku dhaq dharka gacanta labaad (huudheey) 60°C ama ku daawee 45°C qalajiyaha.
- Haddii ay kugu dhacdo kutaan, ha dhigin alaabta guriga jaranjarada, maqaasiinka ama saqafka sare si aad uga ilaaliso deriska inay kutaantu gasho.
- Haddii alaabta guriga la tuuro, fadlan si cad ugu calaamadee inay **kutaan ka buuxdo** ama ka dhig mid aan la isticmaali karin si dadka kale aanay ugu qaadan gurigooda alaabta guriga iyo kutaanta.
- **Haddii aad la joogto qaraabo ama dad aad taqaanid, iska ilaali in aanad boorsadaada ku qaadan kutaanta.**
- Markaad u soo guurayso qolka huteelka ama guri , ka baadh sariirta iyo fareemkeeda kutaan nool (fiiri sawirka tiirka ku xiga) adoo isticmaalaya toosh iftiin xoog leh.

**Sideed ku ogaan kartaa kubadashada kutaanta?**

- Inta lagu jiro maalinta, waxay ku qarsoontahay sariirta, faramekeeda iyo dildilaaca sariirta u dhow.
- Raadka kutaanta, dhibco madow oo yaryar (fiiri sawirka tiirka ku xiga) ama raadka dhiiga ee marada sariirta.
- Inaad guriga ku raadiso eeyaha wax uriya kutaanku waxay u horseedi kartaa daawayn hufan oo ka jaban.

**Maxaa la sameeyaa haddii ay dhacdo kutaan ka buuxsantay qol hotel ah?**

- U sheeg huteelka maamulayaashiisa.
- Codso qol kale, aan eheen midka ku xiga.
- Boorsada dhig meel ka fog sariirta intii suurtagal ah oo xidh dhammaan siibadaha.



kutaan soo dhacday dildilaaca sariirta ee aadka uga buuxdo.
sawir: Magaalada Zurich, ilaalinta deegaanka iyo caafimaadka

**waxa aay tahay in la sameeyo ka dib marka seexato habeen**

**qol eek a buuxdo kutaan?**

- Ku furfur boorsadaada balakoonka.
- Haddii aysan suurtagal ahayn in isla markiiba la dhaqo, ku kaydi dharkaaga bacaha qashinka oo si adag u xirma.
- Isla markiiba ku dhaq 60°C 30 daqiiqo ama laba jeer oo isku xigta 40°C.
- Ku qallaji 30 daqiiqo at 45°C.
- Ku rid qaboojiyaha heerkulka -17°C dhowr maalmood.
- Ku buufin gudaha iyo bannaanka shandad/bacyada madhan bannaanka adigoo isticmaalaya buufinta cayayaanka, ka dibna si fiican haawi qolka maqsinka ama balakoonka.

**Xaaladda sharciga**

Qof kasta oo qandaraas la gala shirkad waa inuu sidoo kale bixiyaa kharashka. Mulkiilaha ama maamulku waa in uu guriga ku kireeyaa si fiican, oo aan cayayaan lahayn (eeg sidoo kale Xeerka Waajibaadka ee Swiss, gaar ahaan sida uu qabo sharciga kirada iyo kan gobolka "Xeerka nadaafadda guud iyo deganaanshaha"). Haddii xayawaanka rabaayada ay joogaan marka loo guurayo guri kiro aaah, tani waxaa loo arkaa inay tahay cillad ku jirta guriga la kiraysto. Milkiilaha ayaa mas'uul ka ah hagaajinta cilladaan. Kharashka si fudud looguma gudbin karo kiraystayaasha. Qodobbada 256, 257f, g, h, 258 iyo 259 ee Xeerka Waajibaadka ayaa ilaaliya xaaladda sharciga ah ee guryaha la deggan yahay.

**Waan ku caawin karnaa**

Nasoo wac, ama Noo soo dir ama noo keen cayayaanka si aan u aqoonsanno. Wadatashigayadu waa lacag la'aan waxaana kaliya loogu talagalay dadka degan Magaalada Zurich. Saacadaha xafiiska telefoonku waa Isniinta ilaa Jimcaha, 1:30 duhurnimo. ilaa 2:30 duhurnimo

Magaalada zurich
Ilaalinta deegaanka iyo Caafimaadka (UGZ)
Qaybta ka hortaga cayayaanka
Eggbühlstrasse 23
8050 Zurich
T +41 44 412 28 38
ugz-schaedlingspraevention@zuerich.ch
stadt-zuerich.ch/schaedlingspraevention